# Xaquuqda ay leeyihiin dadka magan galyo doonka ah ee ka soo gudba xadka ay wadaagaan Mareykanka iyo Canada

Waxaa aad xaq u leedahay in aad badbaado u raadiso nafsadaada iyo mida qoyskaaga. Hagahan waa macluumaad guud ee ma aha la talin sharciyeed. Waxaa jira faahfaahinno gaar ah ee loo baahan yahay in aad tixgeliso macluumaadkan halkan lagugu siiyay ka sokoow, sidaa darted, fadlan, la tasho qareen haddii ay suuragal tahay..

Hagahan waxaa soo saaray Guddi Sharciyeedka ee Ururka Sharciga Ontario (Legal Committee of the Law Union of Ontario) ma na jiro qof sharciga uusan oggolayn. Waxaa taageeray Xafiiska Sharciga ee Afrikaanka-Canadiyanka (African-Canadian Legal Clinic).

## Ka soo geliidda irridda xuduud ah ee laga soo galo

Meesha ah irridda xuduudka ee laga soo galo waa meel aad Canada ka uga soo geli karto si sharci ah. Irridda xagga dhulka loo soo maro ee laga soo galo waa meel ay dad lugaynaya, basas, dad baaskiil wata,tareenno iyo baabuur ay xagga Maraykanka kaga soo galaan Canada. Irdaha kale ee soo gelitaan waa Gegida diyaaradaha iyo Furdooyinka badaha.

Canada iyo Maraykanka waxaa ay saxiixeen heshiis la yiraahdo **Heshiiska Badbaadada Waddan Saddexaad (Safe Third Country Agreement-STCA) ee ka hor istaagaya dad badan in ay codsi ah xaalad qaxootinnimo ka sameeyaan Canada haddii ay ka soo galaan meel kasta ee ah irrid laga soo galo ee sharciga waafaqsan.**

**Diidmadan waxaa ka baxsan saddex arrimood ee muhiim ah.** Marka ay tahay saddexdan marxaladood, xataa haddii aad ka soo gasho irrid sharciyan laga soo geli karo, waa aad u qalmi kartaa in aad aad samayso codsi qaxootinnimo.

1) Waxaa aad u qalmi karaysaa in aad codsi qaxootinnimo samayso adiga oo yimid irrid sharciyan laga soo geli karo ee xagga dhulka ah haddii aad **qoys ku leedahay Canada**, sida xaas aad rag ama dumar wada tihiin ama kuwa is dhaafsan ee isu qaba rag iyo dumar ama dumar iyo rag ahaan, kuwa isu la jira iyaga oon is guursan, mas'uul sharciyaysan (haddii uu codsadaha ka yar yahay 18 sano), carruur, waalid, walaal, carruur ilmahaaga dhaleen, carruur walaalahaa dhaleen. Dhammaan xubnaha qoyska u ma wada qalmayaan.

Waa in aad marka aad soo gaarto u caddaysaa sarkaalka qaxootiga in xubnaha qoyskaaga ay **deggan yihiin Canada** marka aad xadka soo gaarto iyo in ay Canada ku dhex leeyihiin **xaalad qaxootinnimo.**

Xaalad qaxootinnimo Canada dhexdeeda macneheedu waa haddii ay ku guulaysteen dacwaddooda codsi qaxootinnimo ahayd, haddii ay ku jiraan marxalad qimayn ah halista ka jiri karta inta aan dib loo celin, haddii ay haystaan degganaanshaha joogtada ah, muwaadinnimo Canada ah ama qof dib u celintiisii la joojiyay, qof haysta fasax shaqo ama fasax waxbarasho, ama qof sameeyay codsi qaxootinnimo ee weli ay dacwaddiisu socoto. Waxaa aad u baahan doontaa in aad haysato macluumaad lagala xiriiro qofka xubinta qoyskaaga ah (waxaa dhiici karta in sarkaalku uu waco xubinta qoyskaaga su'aalana waa uu weydiin karayaa). Waxaa aad u baahnaan karaysaa waraaqo ama dukumentiyo caddayn kara xiriirka aad la leedahay iyo xaaladdooda joogitaan ee Canada.

2) Waxaa kale oo aad u qalmi karaysaa in aad codsi qaxootinnimo gudbiso haddii aad soo gaarto irrid laga soo galo ee sharciga waafaqsan haddii aad tahay **yaraan aan la la socon.** Tan macneheedu waa waxaa aad ka yar tahay 18, xaas ma lihid Canada na soo ma aadan gaarin adiga oo ay ku la socdaan waalid ama qof kaa mas'uul ah sharciyan, ma na aad ku lihid Canada ama Maraykanka waalid ama qof sharciyan kaa mas'uul ah.

3) Waxaa aad xataa u qalmi karaysaa in aad samayso codsi qaxootinnimo haddii aad haysato **visa sax ah ama dukumenti lagu safro**ee kuu oggolaanaya in aad Canada timaaddo iyo fasax shaqo ama fasax waxbarasho sax ah ama aad ka socoto waddan aan lagaaga baahnayn in aad Canada ku soo gasho visa.

   Haddii aad ku timid **diyaarad ama doon goonni ka ma noqonaysid marka loo eego STCA** waxaa aad na u qalmi karaysaa in aad codsigaaga qaxootinnimo ka billowdo irriddii aad ka soo gashay aysan haddii aysan ahayn in xaalad qaxootinnimo lagaaga soo diiday Maraykanka oo aad Canada hakasho ku marayso kaddib markii lagaa soo masaafuriyay Maraykanka

**<u>Gudbinta codsi qaxootinnimo marka aad joogto Irrid laga soo galo oo sharciyaysan</u>**

`Haddii laguu oggolaado in aad Canada gasho, arrimaha ka baxsan diidmooyinka ee hoos imanaya **STCA**dartood ama adiga oo yimid Gegi Diyaaradeed ama Furdo Badeed, waxaa **waraysi kula yeelan**

**doona sarkaal** irridda aad ka soo gashay kaas oo go'aamin doona haddii aad billaabi karayso in aad codsato xaalad qaxootinnimo (in aad u qalanto in aad samayso **codsi qaxootinnimo**).

Sarkalku waxaa uu kuu oggolaan kara in aad isla markaaba samayso codsi qaxootinnimo, ama waxaa uu kuu oggolaan karaa in aad dib u soo laabato maalin kale si uu waraysi kaaga qaado. Sarkaalka waxaa uu xataa ku gelin karaa xabsi si uu u soo ururso macluumaad dheeraad ah.

Asbaabo qaar ah ee laga yaabo in aan laguu oggolaan karin in aad samayso codsi qaxootinnimo waxaa weeye (1) haddii aad xaalad qaxootinnimo ku leedahay waddan kale ee aad u noqon karto ama (2) haddii aan hore uga samaysay Canada codsi qaxootinnimo oo lagu diiday, dib u ceshatay ama aad ka tagtay, ama laguu ogoolaan waayay in hore loo sii wado, ama laguu tixgeliyo in aad tahay qof aan la "qaadan karin" oo la ogaaday in aad nabadgelyada halis ku tahay ama aad soo samaysay falal dembiyeed culus

Haddii uu sarkaalku kuu ogolaado in aad samayso codsi qaxootinnimo waxaa lagu siinayaa **Warqad Codsade Magan Qaxootinnimo (Refugee Protection Claimant Document)** oo aad u isticmaali kartid in aad hesho daryeel caafimaad iyo/ama cayr, waxaa aad xataa awoodi kartaa in aad codsato fasaxa shaqada.
Waxaa kale oo lagu siinayaa warqad la buuxiyo oo muhiim ah ee la yiraahdo **Aasaaska dacwada (Basis of Claim).** U diyaargaroow. Waxaa loo baahan yahay in aad buuxiso warqaddaa aad na hubiso in la gaarsiiyo Guddiga Socdaalka iyo Qaxootiga 15 maalmood

gudahood. Haddii aad awooddo caawinaad raadsho si aad u buuxiso, iska hubi in macluumaadku dhameystiran yihiin.

**Ka soo gelidda Canada meelo kale ee aan ahayn irridda gelitaanka caadiga ah**

Dad badan ayaa Canada ku soo gala xagga dhulka meelo aan ahayn irdaha laga soo galo ama aan ka soo gudubin xuduudda rasmiga ah. **Tan ma aha "Sharci ku xadgudbid" laakin waa lagu xiri karaa.** Haddii aad gacanta booliiska gasho ama ciidanka socdaalka ee Canada kaddib marka aad timaaddo Canada durbaba u sheeg in waddaankaagii assalka ahaa aad halis ku jirtay.

Marba haddii aad Canada ku sugan tahay, si sharci ah ayaa aad codsi qaxootinnimo uga samayn kartaa sarkaal kasta ee Hay'adda Adeegyada Xuduudka Canada (Canada Border Services Agency) iyo hay'ad kasta ee Socdaal (Immigration), Qaxootiga iyo Xafiiska Jinsiyadda Canada (Refugees and Citizenship Canada) (www.cic.gc.ca.). Waxaa xafiiskan lagaa siinayaa foomam aad soo buuxineysid. Ilaa aad xafiiska ugu soo noqoto adiga oo soo buuxiyay waraaqahan, ma heli karaysid daryeel caafimaad ama adeegyada cayrta ma na codsan karaysid fasaxa shaqada. **Tani waxaa la yiraahda iska dhiibid gudaha.** Si taxaddar leh u diyaari warqadahan maadaama ay noqonayaan salka dacwaddaada uu na arki doono go'aan-sameeyaha gaari doona go'aanka codsigaaga qaxootinnimo.

**Isdifaaciddaada**

Waxi aad ku tiraahdo saraakiisha ciidanka socdaalka (Hay'adda Adeegyada Xuduudda Canada), ama booliiska, waxaa ay noqon doonaan faylka codsigaaga qaxootinnimo qayb ka mid ah waxaa na kaddib weydiinno lagu warsan karayaa marka dhegeysiga dacwaddaada qaxootinnimo. Isku day in aad ku darto inta faahfaahinno ah ee sababta aad uga cabsanayso in aad dib ugu noqoto waddaankaagii asalka ahaa. Bixinta macluumaad la helo in aysan run ahayn ama jawaabahaaga aad wax ka tagto waxaa ay saamayn ku yeelan karayaan sheekadaada haddii hadhow la aamin karaayo.

Waa in aad yeelataa qareen (sharci yaqaan ama la taliye haysta qaxooti oo fasax haysta) si uu kaaga caawiyo buuxinta waraaqaha iyo codsigaaga qaxootinnimo. Waxaa jira qareennno iyo la talileyaal qaxooti si xun u dhaqma marka isku day in aad magacyada qareenno ka hesho ilo lagu kalsoonaan karo ama hay'ad bulsho. Waa in aad isku daydaa in aad qareen la hadasho inta aadan safar gelin. Waxaa xataa dhici karta in aad u qalanto caawinaad sharciyeed ee bilaash ah, iyadoo loo maraayo barnaamij la yiraahdo Cawinaad Sharciyeed (Legal Aid).

Haddii uu qofka kaa caawinayo in aad soo gudubto uu lacag ku qaato caawinaadda, waxaa la kulm doonaai in dacwooyin lagu oogo ee fal dembiyeed ah ama socdaalka la xiriira. Kuwa u fidinaya caawimaad dadka soo gudbaaya waxaa ay u baahan yihiin in ay hubiyaan sida ay samaynayaan in ay ku salaysan tahay oo keliya bani'aadannimo oo ay la socon "qalab faa'iido" ee ay ka helaan. Haddii aad caawinayso qaxooti Canada soo galaya, qaado talo sharciyeed.

Canada dhexdeeda waxaa lagaaga tegi karaa meel aad u go'doosan ee jariirado aan lahayn, guriyayn ama caawinaad aan lahayn. Waxaa aad u suurtogal ah in xilliga qaboobaha (Oktoobar ilaa Abriil meelaha qaarkood ee Canada) in aad la xanuunsato dhibaatooyin caafimaad ee halis ah haddii aad dibedda joogto muddo kasta ee wakhtiga. Soo qaado dhar ku diirriya, raashin, biyo iyo diirriyeyaasha gacmaha iyo lugaha. Soo qaado telefoonkaaga gacanta laakin humi in aad awooddo in aad wicitaanno samayso meelaha uu telefoonkaaga gacanta u isticmaali karto  in aad wacdo ee adeegga wicintaanka uu ka suurtoobi karayo. Badanaa marxaladaha gargaarka degdegga ah Canada ka dhex wac 911, laakin tan macneheedu waa in sidaa oo kalena ayboliis iman karaan.

Halkan ka hel macluumaad dheeri ah ee ku saabsan nidaamka qaxooti ee Canada:
http://refugee.cleo.on.ca/en/refugee-claim-flowchart

Fur ee si ballaaran dib ugu dir Weydiinno? Fadlan email u dir nooneisillegal@riseup.net.

Hagahan sharciyeed waxaa uu ku kooban yahay sharciga qaxootiga ee Canada, ee ah nidaamka sharciyeed ee ugu sarreeya ee ay codsadeyaasha qaxootinnimo la kulmaan. Waxaa aan ku dhiirri gelinaynaa soo galootiga cusub in ay fahmaan in Canada ay tahay dhammaanteed dhulal iska duur ah